



Wiil ma tahay

Oo ma qabtaa su'aalo ku
saabsan gudniinka dumarka?



www.nkvts.no



Waa maxay gudniinka dumarku?

Gudniinka dumarku waa noocyo kala duwan oo qalliin ah halkaas oo qaybo ka mid ah unugga taranka ee dumarka lagu dhaawaco oo lagu gooyo. Labo nooc oo waaweyn ayaa loo qaybiyaa:

- 1) Gudniin kintirka oo dhan la gooyo ama qayb ka mid ah la gooyo. Inta badan bishimaha gudaha ee unugga tarankana waa la gooyaa. Tan waxaa lala barbardhigi karaa wiil laga gooyay madaxa hore ee guska oo kale. Gudniinkan waxaa caadi ahaan loogu yeeraa “gudniinka sunnada”.
- 2) Gudniin la goynayo ama la jeexayo bishimada unugga taranka kaddibna ay isku dhegaan oo unugga taranka sidaas lagu xiro. Midka noocan ah waxaa loogu yeeraa gudniinka fircooniga ah (infibulasjon).

Labada noocba waa dhaawacyo waaweyn kana khatarsan gudniinka wiilasha ee buuryada la gooyo.

Halis miyaa?

Haa. Dhammaan noocyada gudniinka dumarku way kharribaan oo dhaawacaan shaqada unugga taranka. Gudniinku aad iyo aad ayuu u xanuun badan yahay waana halis. Gabdhaha qaar baa u dhinta. Qaar bandanna hurgun/ infakshan ayay qaadaan. Qaar badan ayaa la kulma dhibaato xag jireed iyo mid xag maskaxiyan ah oo noloshooda oo dhan haysa. Xanuun, hurgun iyo burooyin ayuu qofku la kulmi karaa. Qaar bay ku adkaataa in ay uur qaadaan. Dhalmada xanuun inti caadiga ahayd ka badan ayaa lagala kulmaa waana halis. Qaar badan baa dhala ilmo mayd ah. Marka gudniinku yahay nooca fircooniga ah qaar badan ayaa dhibaato la kulma marka ay kaadinayaan, iyo marka ay caadada dumarku ku dhacdo. Dhalmada ka hor waa in lagu sameeyaa qalliin lagu furayo.



Gudniinka dumarku lagamamaarmaan miyaa?

Jirka dumarku waa dhammaystiran yahay. Waxba looma baahna in laga gooyo. Dadka qaar baa u maleeya in gabdhaha gudani in ay kuwa kale ka asturan yihiin gudniinka dartiis. Taasi sax ma aha. Gudniinku waxba kama beddelo adaabta xagga galmada ee gabdhaha iyo habdhaqankooda midna. Gudniinku waa fal dhaqanka ku salaysan, falalka dhaqanka ku salaysanina had iyo jeer way is beddelaan. Taasna waxaad gacan uga geysan kartaa adiga oo caddeeya in aad falkan ka soo horjeedo. Ma jirto diin dhigaysa gudniinka dumarka.

Mamnuuc miyaa gudniinka dumarku?

Dhammaan noocyada gudniinka dumarku waa ka mamnuuc Norway. Mamnuuc ayay ka tahay dhammaan dadka Norway ku nool xataa haddii ay dal kale aadaan si ay wax u soo gudaan. Ku dhowaad dalalka uu gudniinka dumarku caadiga ka yahay oo dhan waxaa ka jira sharci diidaya gudniinka.

Run miyaa in gudniinka dumarku aanu hadda ahayn wax caadi ah?

Dalal badan ayuu dhif ka yahay. Laakiin weli saddex milyan oo gabdhood ayaa sanad walba la guda.



Gabar ma weydiin karaa in ay gudan tahay iyo in kale?

Gudaha qofku waa wax isaga u gaar ah. Dadka intooda badan qof walba taas kalama hadlaan, laakiin laga yaabo in ay kala hadlaan asxaabta ay aadka isugu dhow yihian ama wiilka saaxiibkeed ah ee ay wada socdaan. Kuwa doonaya in uu xiriir galmo dhex maro waa in ay wada hadlaan.

Sidee ayaa lagu ogaan karaa in ay gabari gudan tahay iyo in kale?

Marka dhar la qabo dadka kale ma arki karaan in gabari gudan tahay iyo in kale. Waxaad ku ogaan kartaa iyada oo uu kuu sheegta, ama haddii lays qaawiyo.

Gabdhaha gudani galmada ma ku raaxaystaan?

Jirka oo dhan ayaa galmada dareema, ee unugyada taranka oo keliya ma dareemaan. Waxaa laga yaabaa in ay muhiim dheeri ah tahay in jirka oo dhan la taataabto haddii kintirka la dhaawacay. Waxaa aad iyo aad muhiim u ah in aanay xanuun dareemin. Si ay gabdhu galmada ugu raaxaysato waxaa muhiim ah in ay doonayso, in ay kalsooni qabto iyo in ay lammaanuhu wakhti ku qaataan barashada jirka ee midka midka kale.

Gabar nooca fircooniga ah u gudan uur ma qaadi kartaa?

Haa.





Maxaa loo baahan yahay in ay wiilashu xusuustaan haddii ay u galmoonayaan gabdho la guday?

Galmo waa wax raalli laysaga yahay. Wakhti fiican ku qaado in aad barato jirkaaga iyo midka lammaanahaagaba. Noqda kuwa kalsooni isku qaba. Markaas ayaad isla raaxaysan kartaan, yeelanna kartaan xiriir galmo oo wanaagsan. Haddii ay labaduba doonayaan, way isu galmoon karaan. Haddii ay gabadhu gudan tahay waxaa aad muhiim u ah in la taxaddaro oo lala socdo haddii uu xanuun qabto ama ay la soo gudboonaato cabsi ay ka qabto in xanuun qabto, maaddaama unugga taranku yahay mid aad u dareen badan.

Immisa sano ayaa loo baahan yahay in qofku noqdo si uu galmo u sameeyo?

Da'da ugu yar ee galmo lagu samayn karo ee Norway waa 16 sano jir. Xadka da'du waa mid loogu talo galay in aanay dadka waaweyni u galmoon carruurta ay da'doodu ka hooseyso 16-ka sano, iyo in aanay carruurta iyo dhallinyaradu galmada billaabin iyagoon taas gaarin maskaxiyan iyo jir ahaanba.



Galmadu xanuun ma keeni kartaa?

Waxaa dhici karta in uu gudniinki geystay dhaawacyo keena in galmadu xanuun miiran noqoto. Gabdhaha nooca fircooniga ah loo guday suuragal ma aha in loo galmooda ayaga oo aan xanuun dareemin ilaa iyo inta lagu samaynayo qalliin lagu furayo kaddibna uu nabarku ka biskoonayo. Haddii ay gabadhu xanuun dareemayso ama ay cabsi xanuun daremeyso marka loo galmoonayo, waxay caawin iyo talo ka dalban kartaa dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad.

Sidee ayaa loo furaa gudniinka fircooniga ah?

Dhammaan isbataallada waaweyn waa lagu sameeyaa qalliinka furitaanka ah. Qalliinku waa mid aan isbataalka loo sooxanayn gabadhuna guriga ayay aadaysaa qalliinka furriinka kaddib. Qalliinka noocan ahi wax dhaawac ah uma geysanayo xuubka bikrada.



Buugyarahan waa diyaariyey Xarunta qaranka ee gacan-qaadka iyo karkabada waxa la soo goocdo (Nasjonalt senter om vold og traumatisk stress (NKVTS)) oo ay is-kaashadeen adeegga caafimaadka dugsiyada ee dugsiiga sare ee Sogn iyo la-taliyaha dadka laga tirada badan yahay ee IMDI.

Sancada: Christine Istad

Buugyaraha waxaa isaga oo elegtaroonig ah laga heli karaa bogayaga internetka, www.nkvts.no

Nuqullo daabacan waxaa laga dalban karaa: postmottak@nkvts.unirand.no
ama teleefanka: 22 59 55 00

